

Dhowrkii bilood ee la soo dhaafey, waxaan u sameynay go'aamada waxbarashadda degmadeena anagoo ilaalineyna diiradda aan saareyno badqabka ardayda, shaqaalaha, iyo qoysaska ka tirsan bulshada iskuulka. Waxaan garwaaqsannahay in tani ay ahayd xilli aad u adag dhammaanteen. Waxaan degmad ahaan usii wadeynaa kormeerka macluumaadka gobolka iyo degmada, iyo sidoo kale macluumaadka ka imanaya magaalooyinka deriska nala ah. Ayadoo dhawaanahan ay sii kordhayaan tirooyinka wanaagsan ee COVID-19 ee guud ahaan gobolka iyo isbadalka lama filaanka ah ee ku yimid degmooyinkeena Hennepin iyo Ramsey, MTCS waxay u weecin doontaa dhamaan barnaamijyada waxbarashadda barashada fogaanta laga bilaabo Nofeembar 16, 2020 Waxaan sidoo kale joojin doonaa dhammaan adeegyada umeerin ee degmada oo dhan ah. Degmadu waxay kusii sugnaan doontaa qaabka waxbarashada fog fog dhawrka bilood ee soo socda waxayna dib u eegi doontaa go'aanka bisha Janaayo. Macluumaad dheeraad ah ayaa la siin doonaa dhammaan qoysaska inta lagu jiro muddadan.

Go'aankani maahan mid sahlan degmadeena. Waxaan fahansanahay saameynta isbadalkan uu ku yeelan doono qoysaskeena iyo ardayda. Degmadu waxay sii wadi doontaa inay si dhow ula socoto macluumaadka iyo hagitaanka ay bixiyaan Waaxda Caafimaadka ee Minnesota, Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, iyo degmooyinka maxalliga ah ee qoysaskeena iyo ardaydeenu ku nool yihiin. Waxaan sii wadi doonaa shaqadeena iyada oo loo marayo moodeel waxbarasho oo masaafada fog ah waxaan ku dadaalaynaa inaan siino dhammaan waaya-aragnimadeena waxbarasho ee ugu wanaagsan. Waxaan ku faraxsanahay taageeradaada joogtada ah ee degmadeena, shaqadeenna, iyo u heellanida ardayda, qoysaska, iyo bulshada dugsiiga.

MACLUUMAAD MUHIIM AH:

Haddii aad u baahato caawimaad ama aad su'aalo ka qabtid Covid fadlan ka wac HOTLINE-ka COVID 651-304-6145. Wac lambarka taleefanka adiga oo qaba su'aalo ku saabsan Covid iyo si aad u hesho guryo iyo ilaha cuntada.

Ugu dambeyntiina, haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo la xiriira dugsiiga ama ardaygaaga, fadlan wac Dr. Marisa Rivera Lugo taleefanka 414-450-5738.